
Helping Hand™ *Health Education for Patients and Families*

# Cudur Cidhiidhiya Neef-mareenada
## Subglottic Stenosis (Somali)

Cudurka Cidhiidiya Neef-mareenada waa xaalad ay marinnada hawadu ka yar yihiin inta caadiga ah (waa cidhiidhi) oo ka hooseysa xadhkaha codka (Sawirka 1). Tani waxay keeni kartaa dhibaatooyin xagga neefsashada ah, oo inta badan ay uga sii dartaan xanuun ama dhaqdhaqaaqa.

Waxaa jira 2 nooc oo istarooga cudurka cidhiidhiya neef-mareenada:




**Picture 1** Sidee buu u eg yahay cudurka cidhiidiya neef-marenka ee jirka.


©2011, Dib loo eegay 2024, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- Cudurka Cunuga ladhasha – Ilmahaagu waxa uu ku dhashaa xaaladdan. Tani waxay dhacdaa sababtoo ah wadada neefsashadu si sax ah uma korin.
- Cudurka lagaheley– Waxay dhacday ka dib dhalashad. Tani waxay dhici kartaa infekshanka ama dhaawaca daran ka dib. Waxay sidoo kale dhici kartaa ka dib marka la geliyo tuubbo si looga caawiyo neefsashada (tuubada neefta).

## Aastaamaha

Calaamadaha caadiga ah ee xannibaadda neef-mareenka waa:

- Dhawaaqa sareeya ama sanqadha badan marka uu ilmuhu neefsanayo (shanqadha).
  - shanqadha wuxuu ku dhici karaa ama ku sii xumaan karaa marka ay hargab qabaan. Qabowgu wuxuu adkeeyaa neefsashada wuxuuna culeys saaraa marinnada neefsashada.
  - Shanqadhu waxay noqon kartaa mid aad u sareeysa marka uu ilmahaagu jimicsi sameeyo ama uu dhaqdhaqaaq sameeyo.
- Codka oo qayaxan ama liita.
- Ilmahaagu wuxuu ku dhacay xanuunka xiiqdheerta dhawr jeer ka hor inta uusan gaarin 6 bilood.
- Ma kordhin karo miisaan.

## Baadhitaanka

Ilmahaaga waxaa loo sameyn doonaa baadhitaan caafimaad. Dhakhtarkaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ayaa dib u eegi doona taariikhdaada waxaana laga yaabaa inuu kuu dalbado qaar ka mid ah ama baaritaannadan dhammaantood:

- Raajo
- Baadhitaanka neef-mareenada - Nidaam lagu sameeyo xafiiska si loo eego marin-haweedka sare, oo ay ku jiraan sanduuqa codka iyo xadhkaha codka. Tani waxay u oggolaaneysaa dhaqdhaqaaqa xadhkaha codka in la eego laakiin ma fiiriyo qanjiirka si fiican.
- Badhitaanka neef-mareenada-Qaliinka lagu sameeyo suuxdinta si loo eego qaybta codka oo dhan (qeebta-codka) oo ay ku jirto qaybta codka hoosteeda,qanjiirka.
- Qalliinka neef-mareenka- Qalliin lagu sameeyo suuxdin si loo eego neef-mareenka iyo marinnada neefta.

## Daaweynta

Daaweynta waxay ku xiran tahay xaaladda ilmahaaga. Carruurta qaarkood way iska fiicnaan karaan markay weynaadaan, qaarna waxay u baahan karaan daaweyn.

- Xaaladaha fudud sida caadiga ah si taxadar leh ayaa loola socon karaa ama waxaa lagu daaweyn karaa daawo ama fidinta waddooyinka neefsashada.
- Xaaladaha daran, ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu u baahdo qaliin si loo balaariyo marinka neefsashada. Daaweyntan waxay u baahan kartaa in tuubbo la mariyo habka neefsashada. Tani waxaa loo yaqaan hab lagu caawinayo hawada iyo ogsijiinta inay gaaraan sambabada. Waxay ka caawin doontaa ilmahaaga inuu si fiican u neefsado isagoo ka gudbaya qaybta cidhiidhiga ah ee marin-haweedka ilaa ay ka weynaan karto.

## Goorta ay tahay in la Waco Dhakhtarka

Wac dhakhtarka cunugaaga ama daryeel bixiyahaaga caafimaadka haddi ay:

- Uu ka sii daro, aad u daalan yahay, ay adag tahay inuu tooso, ama u'egyahay mid aad u xanuunsan.
- In maqaarku uu ku soo laabto ama oo jiido feeraha (dib u laabashada) mararka ay neefsanayaan.
- Hayso dulalka sanka oo ballaaran (qalaacsan) markaad neefsanayso.
- Aan kordeynin misaankisa.

## Goorta la wacayo 911

Wac 911 ama u qaad ilmahaaga qaybta gargaarka degdega ah ee kuugu dhow haddii:

- Ay ku adag tahay inay neefsadaan, hadlaan, ama cabbaan.
- Ay bishimahoodu ama wajigoodu isu beddelo midab buluug ah.
- Ay dhareerayaan.